

Jamhuuriyada Somaliland  Republic of Somaliland

Gudiga Diiwaangalinta Ururada Siyaasadda iyo Ansaxinta Axaabta Qaranka

REF: GOULA AS/146 /2012

TAAR: 09/10/2012

**GUDDIDA DIIWAANGALINTA URURADA SIYAASADDA IYO ANSAXINTA
AXSAABTA QARANKA**

Xeer-hosaadka shuruudaha lagu soo xulayo sadax xisbi qaran

Gudida Diwaan-galint iyo Ururada iyo xisbiyada siyaasadda ee Somaliland Waxay si wada jira u saxeexeen Xeerkan Hab-dhaqan (Code of Conduct on Article 6 of Law:14/2011) taariikhdu markay ahayd sagaalkii bishii octoobar ee sanaka laba kun iyo laba iyo toban

Qodobka 1aad: Ciwaan Gaaban

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa “Xeerka hab-dhanqanka ee iftiiminta qodobka 6aad ee Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axaabta Siyaasadda”.

Qodobka 2aad: Qeexitaan

- | | |
|-----------------|---|
| Guddi | waxaa loola jeedaa sida uu dhigayo xeerka Nidaamka Ururda iyo Axaabta Siyaasadda (Xeer Lam. 14/2011), gudiga diiwaangelinta ururada siyaasadda iyo ansixinta axaabta siyaasadda |
| Komishan | waxaa loola jeedaa sida uu dhigayo Xeer Lam: 20/2001 komishanka qaran ee doorashooyinka |
| Maxkamad | waxaa loola jeeda maxkamadda sare ee qaranka |



Ururada /axsaabta waxaa loola jeeda ururada iyo axsaabta ka qaybgalaya doorasha goolayaasha deeganka ee dhicidoonta 28 November 2012

Musharax waxaa loola jeeda musharaxa golaha deegaanka

Qodobka 3aad: Ujeedada xeerka

Ujeedada Xeerkan Hab-dhaqanka Xisbiyada/Ururrada Siyaasadu waa in kor loo qaado waxyaalaha suurto gelin kara inay dhacaan doorashooyin xor iyo xalaal ah, waxyaalahaas oo ay ka mid yihiin:

- a) Ujeedada xeerkani waa inuu sharaxaad hufan ka bixiyo qaabka iyo shuruudaha loo xulayo sadexda xisbi qaran. Xeer-hoosaadkani kama horimanyo xeerka nidaamka ururada iyo axsaabta lakiin waxaa uu sharaxaad kabixinayaa **qodobka 6aad** ee xeerkaasi oo aan u dhignayn si faahfaahsan.
- b) In la isugu dulqaato arrimaha siyaasadda ee dimuqraadiyadda ku dhisan;
- c) In la aqbaloo naatiijada guddida ee kala saarista ururada/axsaabta ee ku salaysan xeerkan;
- c) In la abaabuli karo olole siyaasadeed oo xor ah iyo doodo shacbiga u furan;
- d) In la ixtiraamo lana dhawro Xuquuqda Aadamiga;
- e) Xeerka Hab-dhaqanku waxa uu kaabayaa Xeerarka Nidaamka ururada iyo axsaabta iyo xeerka kale ee doorashooyinka.

Qodobka 4aad: Ku dhaqanka Xeerka

Xisbiyada/Ururrada Siyaasaddu iyaga oo fulinaaya Xeerkan Habdhaqanka waa:

1. Inuu Xisbi/Urur kastaa muujiyo inuu u hoggaansan yahay ku dhaqanka Xeerkan;
2. Inay ku wacyi-geliyaan taageerayaashooda, Wakiillada Xisbiyada/Ururrada, Xubnaha Xisbiga/Ururka iyo Madaxdaba in ay ku dhaqmaan islamarkaana ixtiraamaan meel-marinta iyo ku dhaqanka Xeerkan;
3. Inay adkeeyaan joogteyaanna wada shaqaynta ka dhaxaysa Gudida Diwaangelinta;
4. Inuu ka qaato tallaabo adag oo ka-hortag u ah in lagu xad-gudbo Xeerkan;
5. Inuu qaado tallaabo kasta oo suurtoagal ah inaan la dhiirri-gelin wax kasta oo jabinaaya ama carqaladaynaaya Xeerkan;
6. In uu dadweynaha hortiisa ku cambaareeyo fal kasta oo minjo xaabin kara qabashada doorasho xor iyo xalaal ah.
7. Inuu ballan qaado inuu aqbalayo natiijada doorashada ama uu dacwad ka furto Maxkamada ay khusayso, haddii uu ku qanci waayo natiijada Gudida Diwaan-gelinta ee soo saarista sadexda xisbi qaran.

Qodobka 5aad: Waajibaadka Guddida Diwaangelinta



Sida ku cad xeerka nidaamka ururada iyo axsaabta, Guddiga diwaangelintu waxay awood sharciyeed u leedahay inay kala saarto ururada u tartamaayaa golayaasha deegaanka kuna dhawaaqdo sadexda xisbi qaran ee noqonaya sadexda xisbi qaran ee 10 sanadood ee soo socda.

Qodobka 6aad: Awoodda xeer-nidaamiye-samaynta ee Guddida (Power to issue regulations)

Sida ku cad qodobka 26aad ee xeerka ururada iyo axsaabta siyaasadda, Guddidu waxay awood u leedahay inay samayso xeer-nidaamiye (regulations) iyo xeer-hoosaadyo (code of conducts) aan ka horimanayn Xeerka. Guddidu ayadoo cuskanaysa qodobkaasi, waxay awood sharciyeed u leedahay inay samayso Xeer-hoosaadkan kasoo ka duulaya siyaasadda uu xeerku ku salaysan yahay.

Qodobka 7aad: Waajibaadka Komishanka Doorashooyinka

Komishanka doorashooyinka waxaa waajib ku ah inay qabtaan doorashada isla markaasina naatijada oo gobolaysan ay u soo gudbiyaan Gudida Diiwaangelinta, si Guddidu ay u kala saarto ururada/axsaabta.

Qodobka 8aad: Waajibaadka ururada/asxaabta

Waxaa waajib ku ah ururada/axsaabta siyaasadda inay ku dhaqamaan isla markaasina fuliyaan qodobada Xeer-hoosaadkan. Ururada/axsaabta waxaa lagu dhaqayaa xeer-hoosaadkan marka la eegayo qaabka ka kala saarista ururada/asxaabta.

Qodobka 9aad: Hanaanka kala reebista ururada iyo xisbiyada

Sida uu dhigayo qodobka 6aad ee Xeerka Nidaamku, Ururada/Axsaabtu waxay ku heshiyeen in habka kalasarta loo raaco sidan:



6
Qodobka 6aad: Hanaanka kala reebista ururada iyo xisbiyada

Sida uu dhigayo qodobka 6aad ee Xeerka Nidaamku, Ururada/Axsaabtu waxay ku heshiyeen in habka kalasaarta loo raaco sidan:

A. Siyaasada xeerkan lagu abuuray, ee uu ku fadhiyaa waa inuu gobalada dalka ku leeyahay xisbi/urur kastaa taageerayaal mug leh oo ku fadhiya boqolayda si ay u noqdaan sedex xisbi ee soo baxaa xisbiyo qaran, oo ka wakiil ah dhamaan gobolada dalka Somaliland.

F.1aad – Wuxuu leeyahay isagoo saldhigiisu yahay boqolayda, saddex urur/xisbi ee gaadha lixda gobol boqolkiiba 20% ayay guddidu u aqoonsanaysaa xisbi qaran, lana siinayaa shahaado xisbi qaran.

F.2aad – Haddii hal xisbi/urur uu gaadho boqolkiiba 20% waxay guddigu u aqoon sanaysaa xisbi qaran, isaga iyo labad xisbi/urur ee ku xiga kala saraynta isku geynta boqolayda gobol kasta gaarkiisa.

F.3aad – Haddii ay isleekaadaan laba xisbi/urur ama ka badan isku gaynta kala saraynta boqolayda gobol kasta gaarkiisa, waxa loogu kala saarayaa sida ay ugu kala badan yihiin codadka guud ee dalka

F.4aad – Haddii ururada/xisbiyada siyaasada midna gaadhi waayo 20% waxay guddidu u aqoonsanaysaa xisbiyo qaran saddexda xisbi/urur ee ugu tirade badan kala saraynta codadka boqolayda gobol kasta gaarkiisa.

Qodobka 10aad: Isticmaalida Boqolayda

Hanaanka kala saarsita ururada/axsaabta laguma isticmaalikaro isudarka boqolayda (**Adding Percentages**). Waxaa reeban in qaab-xisaabeedka kala saarsita lagu saleeyo isu darka guud ee boqolayda gobolada dalka.




Saxeexayaasha Habraaca Qod 6aad Ee xeer No 14/2011 Faq=1-2-3 iyo 4aad

WAXAA LAGU SAXEEXAY HARGAYSA MANTA OO AY TAARIIKHDU TAHAY / ___/___/___

Xisbiga KULMIYE


Mudane : Muuse Biixi Cabdi



Guddomiyaha xisbiga KULMIYE

Xisbiga UCID


Mudane: Faysal Cali Xussen



Guddomiyaha xisbiga UCID


Ururka DALSAN

Mudane : Ismaacil Aadan Cismaan




Ururka RAYS

Mudane : Xassan Maxamed Cali



Ururka UMADDA


Mudane : Maxamed Cabdi Gaboose



Ururka XAQSOOR



Mudane : Xassan Ciise Jaamc




Ururka WADDANI

Mudane : Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillahi



**Guddomiyaha Guddida Diiwaangelinta Ururada Siyaasada Iyo
Anxinta Axaabta Qaranka (RAC)**

Cabdirasaaq Jaamac Cumar



Natijada Mala-Awaalka

	A	B	C	D	E	F	G	Total
1	Gobolka awdal 16,242 19.40%	4,566 5.45%	5,322 6.36%	9,796 11.70%	21,252 25.39%	3,945 4.71%	22,589 26.98%	83,706
2	Gobolka Maroodi- Jeex 53,606 22.26%	13,816 5.74%	27,717 11.51%	36,771 15.27%	37,399 15.53%	21,748 9.03%	49,767 20.67%	240,824
3	Gobolka Saaxil 4,832 16.17%	9,125 30.53%	5,443 18.21%	2,979 9.79%	3,011 10.07%	1,576 5.27%	2,924 9.78%	290,890
4	Gobolka Togdheer 21,198 18.65%	14,149 12.45%	13,004 11.44%	23,140 20.35%	11,952 10.51%	15,768 13.87%	14,481 12.74%	113,692
5	Gobolka Sool 1,800 8.46%	7,668 36.06%	1,151 5.41%	684 3.22%	6,362 29.91%	380 1.79%	3,222 15.15%	21,267
6	Gobolka Sanaag 11,388 18.86%	14,754 24.44%	14,316 23.71%	5,540 9.18%	5,513 9.13%	3,900 6.46%	4,956 8.21%	60,367
	Total Vote	109,066	66,953	78,910	85,489	47,317	97,939	549,746

Ranking

	A	B	C	D	E	F	G	
1	Gobolka Awdal 3	6	5	4	2	7	1	
2	Gobolka Maroodi-Jeex 1	7	5	4	3	6	2	
3	Gobolka Saaxil 3	1	2	5	4	7	6	
4	Gobolka Togdheer 2	5	6	1	7	3	4	
5	Gobolka Sanaag 4	1	5	6	2	7	3	
6	Gobolka Sool 3	1	2	4	5	7	6	
	TOTAL	16	25	24	23	37	22	
Waxaa Guulaystay		A	B					G

FIIRO GAAR AH :- shaxdani waa raankinkii (ranking) lagu kala saaray axsaabta qaranka iyo ururada u tartamaaya doorashada dawladdaha hoose.

